SAFARKII MARYAN

Maryan waxa ay doonaysaa in ay soo booqato ayeeydeed. Ayeydu waxa ay ku nooshahay tuulo yar oo ku taala magaalada duleedkeeda.

Maryan waxa ay ku ridday dambiishii muus, cambe, qare iyo babaay.

Maryan waxa ay dhex martay kaynta. Kaynta waxaa ku nool daayeerro fara badan. Maryan ma aysan arag daanyeerada geedaha saran.

Maryan waxa ay filaysaa, in ayeeydeed farxi doonto sababtoo ah waxa ay jeceshahay muuska.

Maryan waxa ay filaysaa, in ayeeydeed farxi doonto sababtoo ah waxa ay jeceshahay cambaha.

Maryan waxa ay filaysaa, in ayeeydeed farxi doonto sababtoo ah waxa ay jeceshahay babaayga.

Maryan waxa ay filaysaa, in ayeeydeed farxi doonto sababtoo ah waxa ay jeceshahay qaraha.

Daayeerradu waxaa ay ka gurteen Maryan dambiisheeda muus, cambe, babaay iyo qare waxay ugu rideen liin macaan.

Halkee daayeeradu ka keeneen liin macaanta?

Gabadha ayeydeed aad ayey u faraxday makay aragtay dambiil ay ka buuxdo liin macaan. Maryan ayeydeed baa tiri, ”Liin macaantu aad baan u jeclahay, waadna mahadsan tahay.”

Maryan aad bay u faraxday iyadoo yaaban.

Bal garo maryan waxay la yaabtay?

DIGAAGAD IYO SAAXIIBADEED

Digaagad yar baa heshay xabbad haruur ah.

Waxay saaxiibadeed ku tiri,”Waxaan soo helay xabbad haruur ah. Yaa raba in uu ila abuuro haruurka?”

Jiirkii wuxuu yiri, ”Anigu ma rabo.”

Baisadii waxay tiri, ”Anigu ma rabo.”

Ridiina waxay tiri, ”Anigu ma rabo.”

Digaagadii yarayd baa tiri, ”Aniga ayaa raba.”

Digaagaddii waxay abuurtay xabbaddii haruurka ahayd. Muddo ka dib waxaa biqlay haruurkii.

Digaagadii yarayd waxay tiri,”Yaa raba in uu biyo keeno?”

Jiirkii wuxuu yiri, ”Anigu ma keenayo.”

Baisadii waxay tiri, ”Anigu ma keenayo.”

Ridiina waxay tiri, ”Anigu ma keenayo.”

Digaagadii yarayd baa tiri, ”Aniga ayaa keenayo.”

Digaagadii yarayd baa tiri, ”Aniga ayaa waraabinaya.”

Haruurkii bay waraabisay.

Dabadeed, haruurkii baa dhalay sabuul weyn.

Digaagadii yarayd waxay tiri,”Yaa raba in uu soo gooyo sabuulka weyn?”

Jiirkii wuxuu yiri, ”Anigu ma soo gooynayo.”

Baisadii waxay tiri, ”Anigu ma soo gooynayo.”

Ridiina waxay tiri, ”Anigu ma soo gooynayo.”

Digaagadii yarayd baa tiri, ”Aniga ayaa soo gooynaya.”

Markaas, waxay soo goosatay sabuulkii weynaa.

Waxay haddana weydiisay,”Yaa raba in uu haruurka shiido oo jariir ka dhigaya?”

Jiirkii wuxuu yiri, ”Anigu ma shiidayo.”

Baisadii waxay tiri, ”Anigu ma shiidayo.”

Ridiina waxay tiri, ”Anigu ma shiidayo.”

Digaagadii yarayd baa tiri, ”Aniga ayaa shiidaya oo jariir ka samaynaya.”

Markaas, haruurkii ayey kal iyo mooye u qaadatay oo jariir ka dhigtay.

Waxay haddana weydiisay jiirkii, bisadii iyo ridii in ay jariirta ka sameeyaa soor, laakiin waa ay diideen.

Digaagadii yarayd baa tiri, ”Aniga ayaa jariirta soo ka samaynaya soor.”

Markaa, jariirtii ayey ka hagaajisay soor wacan oo wanaagsan.

Waxay haddana weydiisay,”Yaa raba in uu cuno soortan wacan oo wanaagsan?”

Jiirkii, bisaddii iyo ridiiba waxay yiraahdeeni, ”Annaga ayaa rabna.”

Digaagadii yarayd baa qaylisay oo tiri, ”Maya, maya, cunimaysaan, aniga ayaa tabcaday oo cunaya.”

Markaa, digaagaddii yarayd sidaas ayey ku cuntay soortii fiicnayd.

SHEEKADII DABAGAALLE

Beri baa waxaa jiray dabagaalleyaal badan, kuwaasoo meel ku wada noolaa.

Maalin maalmaha ka mid ah ayey isa soo raaceen dabagaalleyaashii waxay galeen guri bakeyleyaal ay deggan yihiin oo aad u qurux badan. Guriga waxaa yaallay bootarro (boolbaro) midabbo badan leh. Mid ka mid ah dabagaalleyaashii ayaa marsadey midab dahabi ah, dabadeedna wuxuu isku eegay muraayad guriga dhex tiilay. Dabagaallihii aad ayuu isula dhacay oo isu maleeyey in uu dahab ka kooban yahay. Dabagaallihii wuxuu bilaabay ciyaar iyo boodbood.

Dabagaalleyaashii mid ka mid ah ayaa arkay bakeylleyaashii guriga lahaa oo soo socda, oo intay ugaarsi tageen soo hungoobay.

Dabagaalleyaashii kale waxay u digeen saaxiibkood oo ay ku yiraahdeen, “Waryaa inaga keen meesha, bakeyleyaashii waa kuwane.” Dabagaallihi wuu is dhega tiray oo wuxuu sii watey ciyaartiisii iyo bood boodkiisii.

Bakeyleyaashii ayaa u soo galey isaga oo muraayadii isku daawanaya. Si dhib yar inta ay u qabteen ayey ciqaabeen. Waxayna yiraahdeen, ”Ma maanta ayuu dabagaalle gurigii noogu soo galey, innaguna duurka ayaan ka raadinaynay wakhti dheer.”

MAROODI IYO BAKEYLE

Beri baa waxaa jirey maroodi iyo bakeyle saaxiib ah. Maalin walba webiga ayey u dabaal tegi jireen.

Markasta oo ay dabaal tagaan maroodigu inta kor u qaado bakeylaha ayuu biyaha dhexdooda dhigaa, bakeyluhuna biyaha webiga ayuu ku dhex hafadaa, waayo si uu u dabaasho ma yaqaan. Bakeyluhu maalin walba wuxuu ka soo baxaa biyaha isaga oo aad u daalan. Inta badan waxaa dhacda in marka uu biyaha ka soo baxayo dhoobadu ku dhegto.

Maroodigu maba oga dhibaatada bakeylaha haysata. Maroodigu wuxuu is leeyahay saaxiibkaa ka farxi.

Maalintii danbe ayuu bakeylihii wuxuu ku yiri maroodigii, “Saaxiib, waxyaalaha aad ciyaarta ka dhiganayso anigu waa dhimashadeyda, sidaa daraadeed kulama ciyaari karo.” Maroodigii yaab ayaa ka soo haray, markaasuu bakeyle ku yiri, ”Bakeylow, anigu waan ku cayaarsiinayey, adna waad dhibsatey ee maxaan kugu sameeyey?” Bakeylihi ayaa yiri, “Ma maqashey waxa la yiri, ´Nin waxa uu ku raaxaysto ninka kale ayey dhibtiisu tahay, ee saaxiib amaanka iigu dadaal.´”

CUMAR BEENAALE

Beri baa waxaa jiray wiil la yiraahdo Cumar Beenaale, kaasoo ariga u raaci jiray reero tuulo deggan. Wuxuu ariga u daaq geyn jiray kayn geedo badan oo tuulada agagaarkeeda ah. Wuxuu dadka ariga leh bishii ka qaadan jiray qadar lacag ah.

Maalin maalin maalmaha ka mid ah ayuu jeclaystay Cumar Beenaale in uu tuulaha tago, si taasi ugu suurogashana intuu arigii xagga tuulada u soo didiyey isaga oo ku dhawaaqaya, ”Waa waraabe! I soo gaara! Waa waraabe! I soo gaara!”

Dadkii tuulada oo dhan ayaa inta ay ku argagaxeen qayladii Cumar Beenaale ayey iyaga oo ulo iyo gudimo wata si degdeg ah ugu soo gurmadeen xaggii Cumar iyo arigii. Markay dadkii u yimaaddeen Cumar iyo arigii oo bed qaba ayey weydiiyeen, ”Waraabaha aad sheegeysay mee?” Dadkii soo gurmaday waxay ogaadeen in wax waraabe ah uusan meesha joogin. Hadaba, waxay noqotay in Cumar iyo arigiiba maalintaa tuuladii loo kaxeeyo.

Cumar Beenaaale markii uu ogaaday in beentiisii hore u hirgashay ayuu dhowr cisho ka dib isaga oo adeegsanaya xeeladiisii hore, ayuu intuu arigii u didiyey xaggii tuulada, aad ugu qayliyey, ”Waa waraabe! Waa waraabe!” Hase ahaatee, markii dadkii soo gurmaday oo ay arki waayeen waraabe iyo raad toona, waxay waydiiyeen, ”Maxaa kugu kaliftay in aad been noo sheegto” Kolkaasuu yiri, “Waan baqay oo waxaan u baahday wehel.” Dadkii tuulada degganaa arintan uu Cumar sameeyey aad iyo aad ayey uga xumaadeen beentiisa aan raadka lahayn. Cumar maalintaa waxay u bixiyeen Cumar Beenaale, waxayna noqotay in wax kasta oo uu sheego loo qaato been.

Maalin maalmaha ka mid ah waxaa dhacday in Cumar Beenaale oo arigii kaynta la jooga ayaa wuxuu arkay waraabe ku soo socda, markaas ayuu qaliyey oo uu yiri, “Soo baxaay, soo baxaay, waa waraabe, waa waraabe!” Dadkii tuulada degganaa cidina uma soo gurman oo waxaa loo qaatay in markanna uu been sheegayo. Waraabihii wuxuu cunay arigii oo dhan, Cumarna isaga oo baxsad ah ayuu tuuladii ku noqday.

Cumar Beenaale wax hawl ah looma dirsan jirin waagaa wixii ka dambeeyey.

NIN CAAQIL AH

Beri ayaa waxaa degganaa webiga daafihiisa reero. Webiga bartamihiisa waxaa ku yiiley geed liin ah, geedka liinta ahi waxaa ag deggenaa daayeerro. Daayeerradu waxay ilaan jireen geedka liinta ah si aan loo cunin. Dadkii ag deggenaa webiga daafihiisa waxaa ku adkaatey in ay helaan liinta.

Waa dambe waxaa tuulada u soo martiyey nin sheegtey in uu caaqil yahay. Ninkii caaqilka ahaa dadkii ayaa ku soo xoonmay, waxeyna ku yiraahdeen, ”Haddii aad rabtid in aan kuu caleemo saarno caaqilnimo waa in aan helnaa liintaa daanyeerradu ilaalinayaan.”

Ninkii caaqilka ahaa wuxuu tagey webiga qarkiisa, wuxuu u sheegey dadkii in dhagaxaan badan ay soo uruuriyaan. Ninkii waxa uu bilaabey in uu dhagxaanta ku tuuro daayeerrada. Dhagxaantiina waxay ku dhaceen meel daayeerrada agtooda ah. Daayeerradii inta aad u caroodeen oo geedkii liinta ka soo gooyeen liin aad u badan ka dibna ku soo tuureen niikii caaqilka ahaa. Dadakii tuulada deggenaa waxay heleen liintii ay doonayeen.

Dadkii tuulada degganaa inta isu yimaadeen ayey ninkii u aqoonsadeen in uu yahay nin caaqil ah.

GABAR IYO AYEYDEED

Beri ayaa waxaa isa soo raacey gabar yar iyo ayeydeed, waxey yimaadeen webi weyn oo ay biyihiisa madow yihiin. Webiga dhexdiisa waxaana ku yaalley beer qurux badan. Waxeyna ku arkeeen webigii dhexiisa yaxaas weyn. Yaxaaskii wuu gaajeysnaa, wuxuu doonayey in uu na cuno ciddii webiga soo gasha.Beerta webiga ku dhex taal waxaa daaqayey ari fara badan.

Yaxaaskii ayaan ku yiri gabadhii, ”Waan gaajeysnahay oo waxan rabaa hilibka ayeydaa.” Waxa ay garatey in yaxaasku rabo in uu cuno. Ayeydii ayaa ku tiri yaxaaskii, ”Maxaad u cuniweydey ariga halkaa daaqaya. Yaxaaskii baa ku jawaabey, ”Hilibka ariga waa kharaar ee waxaan kaa doonayaa in aad i siiso gabdhada aad ayeyda u tahay.” Ayeydii baa ku tiri yaxaaskii, ”Haddii aad biyo na siisid waan ku siinayaa, laakiin ma rabo in aad cunto gabadha oo waxaan doonayaa in ay ku shaqeeyso oo ariga kuu raacdo.” Yaxaaskii baa ogolaadey balantii ay ayeydii uu la galey.

Gabadhii iyo ayeydiiba halkii bey biyahii ka cabeen. Markii ay biyihii ka dhergeen ayey iska tageen. Yaxaaskii inta xanaaqey ayuu ku yiri, ”Idinkana waxaa idinka dheer webi dambe oo aad biyo ka cabtaan.”

gabadha iyo ayeydeed waagaa ayaa ugu dambeeyey in ay biyo webi cabbaan.

WAN IYO DAWACO

Beri baa waxaa socdaal wada galay wan iyo dawaco. Kolkii ay in badan socdeen ayey heleen labo guri. Wankii waxaa uu heley guri qurux badan, dawacadiina waxaa ay heshey guri dulduleela.

Maalin maalmaha ka mid ah ayaa dawacadii iyada oo gurigeedii ku socota ayaa waxa da’ay roob. Dawacadii waa ay qoyday.

Dawacadii caqliga badneyd aya wankii ku tiri, ”Wanow, anigu waxaan leeyahay guri qurux badan.” Wankii ayaa yiri, ”Dawacooy maxaad doonaysaa?” Dawacadii baa tiri, ”Wanow waxaan leeyahay guri qurux badan, kaalay soo arag.”

Wankii baa raacay dawacadii. Wanku waxaa uu arkay gurigeedi dawacada oo dulduleela, waxaana uu weydiiyey dulduleeladii. Dawacdii ayaa tiri, ”Markuu cadaw i soo weeraro waxan ka baxaa duleelkaan rabo, adiguna hal irid uun baad leedahay oo haddii cadow ku soo weeraro meel aad ka baxdo malihid.”

Wankii baa waxa uu ka baryey dawacadii in ay ka bedelato guriga, dawacdii ayaa diiday ayadoo faraxsan oo hoosta ka qosleysa. Wankii baa aad uu baryey dawacadii, markii danbe ayey ogolaatey dawacadii. Dawacadii oo aad u faraxsan ayaa gurigii ka bedelatay wankii.

DAWACO IYO LIBAAX

Beri waxaa shiray habardugaag. Shirkuna wuxuu ahaa sidii loo qaybsan lahaa neef buuran. Boqorkii habardugaa oo ah libaax ayaa yiri, “Waraaboow neefkan buuran inoo qaybi.”

Waraabe inta aad u farxay ayuu yiri, “Jeex waxaa iska leh libaaxa, jeexa kalena habardugaag inta soo hadhay ha qaybsato.”

Libaax markii uu intaa maqlay ayuu xanaaqay oo dharbaaxo kulul waraabe qabadsiiyey. Waraabihii il baa ka soo dhacday. Waraabihii oo isha haysta ayaa meel iska fariistay.

Libaaxii ayaa dawaco u yeeray oo ku yiri, “Dawaco bal adna neefka inoo qaybi.”

Dawaco ayaa tiri, “Neefka waxa loo qaybinayaa labo jeex, jeex waxaa libaax, jeexa harayna boqorka habardugaag.”

Libaaxii baa bilaabay in uu neefkii cuno.

Habardugaag oo qatan ayaa dawaco ku yiri, “Dawacooy maxaad sidan u yeeshay?” Dawaco ayaa ugu jawaabtay, “Wixi ku dhacay waraabe ayaan cashar ka qaatey.”

DIGAAGAD IYO DHAGAX

Beri waxaa jirey digaagad yar oo caqli badan. Digaagadaasi Waxey ku caan baxdey geesinimo. Habeen habeenada ka mid ah ayey guureysay carriguna mugdi ayuu ahaa.

Markii ay in muddo ah socotay ayey aragtay wax wadada dhex fadhiya. Digaagadii waxay u maleysay in wuxu yahay bahal iyada sugaya. Digaagaddii waxay la soo baxday warankeedii iyo gashaankeedii, waxayna isu diyaarisay dagaal. Digaagaddii baa waxay tiri, “Yur, yur, yur, yur. Wallee aniga caawa ima dagtid.”

Digaagaddu habeenkii oo dhan halkii ayey la yuurartay warankeedii iyo gaashaankeedii, iyadoo gaadeysa waxa hor fadhiya.

Markii uu waagii baryey, digaagaddii waxay ogaatay in waxa jidka dhex yaalla uu ahaa dhagax weyn. Diggaagadii waxay iska sii wadatay safarteedii.

Waagaa wixii ka dambeeyey waxaa la ogaaday in digaaggu uusan habeenkii socon.

WARAABE IYO HABARDUGAAG

Beri ayaa waraabe wuxuu u dacwooday habardugaag. Waraabe wuxuu habardugaag ku yiri, “Waxaa rabaa in la iga bedalo magaca waraabe.” Habrdugaag ayaa waraabe ku yiri, “Maxaan kuu bixinnaa?” Waraabe waxaa uu yiri, “Waxaan rabaa in la ii bixiyo Aamin.”

Habardugaag ayaa waraabe waxay ku yiraahdeen, ”Geedkan ayaan waxaan ku xiraynaa lax aad u buuran. Laxdaa halkaa ha ku xirnaato, adna ha cunin oo ilaali muddo laba maalmood ah. Hadaba, haddii aan kuu nimaadno laba maalmood ka dib laxdaa oo bed qabta, waxaa kuu bixinaynaa Aamin. Waraaboow xusuuo ballanteennu waa laba maalmood.”

Waraabe maalintii hore waa uu adkeystay, laakiin maalintii labaad waxaa qabatey gaajo aad u daran. Waraabe gaajadii ayuu u adkeysan waayey oo laxdii buu cunay.

Waqtigii ballantu ahayd markii la gaaray ayey habrdugaag oo dhan waraabe u yimaadeen oo weydiiyeen bal in ay laxdii weli nooshahay. Waraabe inta qoslay ayuu habardugaag ku yiri, “Ma waraabaa aamin gala?”

Waraabihi halkaas ayuu ku fashilmey magaciina ku waayey.

DAWACO IYO CAASHO

Caasha maalin jimace ah ayey soo baxadey waxa ay u soo socotey saxiibteed. Waxa ay mareysey meel duur ah oo dhir badan oo kayn ah.

Caasha waa ay cabsatay, waayo waxay aregtay dawaaco weyn oo wadada dhex jeefta. Caasha waxay ku fikirtay siday uga gudbi laheyd wadada. Waxa ay is weydisey in ay nooshahay iyo in ay dhimatay. Caasha waxay soo dul istaagtay dawacadii oo hubisay in ay nooshahay iyo in ay dhimatay, markaas ayey taabatay dawacadii. Dawacadii baa neefsatay. Caasha inta naxdey ayey qeylisey, dawacdiina inta ay sara kacday ayey oradey.

Caasha sidaas ayey uga badbaaday dawacadii.

DIIN IYO MAROODI

Beri baa waxa isa soo raacey diin iyo maroodi. Labadoodii baa sheekeystay.

Diinkii baa yiri, “Anigu waan kaa dheereya.” Maroodigii baa yiri, “Igama dheereyn kartid. Anigu waan kaa weynahay adiguse waad yar tahay.”

Diinkii waxa uu yiri, “Haa waan awooda oo waa inoo berri.”

Diinkii waxuu u yimid saxiibkiis, wuxuuna ku yiri, “Saaxiib berri waxaan la tartamayaa maroodi.”

Diinka saaxiibkii baa weydiiyey, “Ma awooda?” Diinkii baa ku jawaabay, “Adiga ayaa iga caawinaya sidii aan orodka uga badin lahaa. Adigu waxaad istaagaysaa meesha orodka laga bilaabayo, anna waxaa sii istaagayaa barta uu orodku ku dhamaado.”

Sidaas ayey uga guuleysteen maroodigii.

DAMEERKII CALI

Waa waayada ka mid ah ayaa nin la yiraahdo Cali waxaa uu lahaa dameer. Cali dameerkii ayuu suuqa xoolaha keenay si looga iibsado.

Cali oo dameerkii suuqa la jooga waxaa u yimid nin doonaya in uu iibsado dameer.

Ninkii ayaa waxaa uu jecleystay in uu iska hubiyo dameerka Cali. Ninkii wuxuu damcay in dameerka ilkihiisa iska hubiyo, markaasuu dameerkii qaniinay ninkii. Ninkii baa hadana wuxuu qabtay sayntii dameerka. Dameerkii inta xanaaqay ayuu ninkii harraati ku jiiday.

Ninkii dameerka iibsan lahaa inta aad u xanaaqay ayuu ninkii dameerka lahaa ku yiri, “Caliyow cidna dameerka anshaxa daran kaama iibsanayso ee sidaa ogow.” Cali ayaa ninkii u jawaabay oo ku yiri, “ Dameerkeyga waa dameer fiican ee ragga dabciga xun ayuu neceb yahay.”

SHABEEL IYO DAMEER

Shabeelka wuxuu ka mid yahay bahalaha aadka u jecel hilibka, weliba waxa la yiraahdaa wuxu sii jecel yahay in uu cuno hilibka dameeraha.

Shabeel ayaa habeen habeennada ka mid ah ayuu wuxu arkay dameer hilib saran oo cidla maraya. Shabeelkiii inta farxaddii ka badatay ayuu orad isku taabtay oo wuxuuna yiri, “Hah! caawa nasiib badniyaa waa anigoo helay hilib hilib saran.”

Intuu farxaddii iyo oradki ku maqnaa ayaa dameerkii hilibku saaraa ka mirqay. Shabeelkii qoomamo ayuu qamuunyo qawlalada isku gooyey oo madaxa ruxay oo wuxuu ku cabaaday, “Allow, yey mar meel uga bururuf tiraahdaa.” Sidaas ayuu shabeelkii ku waayey hilibkii iyo dameerkiiba.

Bururuf = Waa codka ka soo baxa dameeraha kolka ay duufsanayaan.

HAL IYO GERI

Waa baa waxaa meel wada degganaa hal geel ah iyo geri ah. Berigii dambe ayay labadoodiiba wada dhaleen. Nirigtii iyo gerigii yaraa baa si wanaagsan u kobcay.

Hasha iyo geriguba maalin walba waxay u daaq tegi jireen meel ka yara durugsan deegaankooda. Nirigta iyo geriga yarba waxaa looga tego jirey deegaankooda.

Maali maalmaha ka mid ah ayaa gerigii yaraa iyo nirigtii oo meel ku wada ciyaaraya ayay nirigtii si xun u harraatiday gerigii yaraa. Geriga yari waa uu suuxay, nirigtiina waxaa ay dul fariisatay gerigii yaraa.

Carraabihii ayey hashii deegaankii ku soo noqotay, waxayna aragtay nirigteedii waxa ay samaysay. Hashii cagaha ayey wax ka dayday oo meeshiina ka carartay iyadoo nirigtii wadata inta aanu geriga meesha ku soo gaarin. Waayo, hashu aad ayey geriga uga baqi jirtay.

In yar ka dib deegaankii waxaa ku soo laabtay gerigii, kolkaasuu arkay gerigii yaraa oo suuxsan. Inta aad u carooday ayuu bilaabay in uu ka daba tago hashii.

Hashii oo fakad ah ayaa waxaa ay la kulantay oday geel meel la jooga. Hashii baa odaygii ku tiri, “Odeyoow ma i maashaa oo ma i maraqdaa oo geri cadho leh mayga celin kari?” Odeygii oo aad u faraxsan ayaa ugu jawaabay hashii, “Waayahaye soo raac geelayga.”

Gerigii oo xanaaqsan ayaa soo weerarey odeygii. Odaygiina aayar ayuu iska celiyey.

HABAR INDHA LA’

Waxaa la yiri habar indha la’ ayaa dudun hoos fariisatay. Habartii baa taabatay duduntii, markaasay yaabtay.Habartu waxay la yaabtey dudunta weynaanteeda iyo adaygeeda.

Habarta naagtii la socotay ayey weydiisey, ”Yaa dhisay duduntan?” Naagtii baa ku tiri habartii, ”Dudunta aboor baa dhisay, habeen buuna dhisay, inta dhoobada candhuuftiisu ku qooyo ayuu dudun ka dhisay.” Habartii indhaha la’ayd ayaa dabeetana naagtii ku tiri, ”Hal waa yaab, halna waa yaabka yaabkiis, halna waa amankaag. Hal waa yaab oo aboor baa dundumo dhisa waa yaab, halna waa yaabka yaabkiis oo candhuuftiisuu ku dhisaa dundumada waa yaabka yaabkiis, halana waa amankaag oo wuxuu dundumada aboorku dhisa habeenkii waa amankaag.”

CIGAAL IYO XAASKIISA

Beri baa waxaa jiray reero tuulo wada deggenaa.
Cigaal Shiidaad reerkiisuna tuuladaas ayey deganaayeen.

Maalin waxaa tuuladii loo soo sheegay dhiillo colaadeed. Cigaal xaaskiisii ayaa maqashey. Xaaskii Cigaal ayaa oradey oo ninkeedii ku tiri, “War Cigaal waxa la sheegeyaa col ee ka kac meesha oo raga soo wareyso.” Cigaal wuxuu ku jawaabey, "Naa weligaa ayaad balaayo sheegtaaye dhiillo hana gelin ee dhibaatada naga daa.” Xaaskii Cigaal baa tiri, "Warkan dadka oo dhan ayaa sheegeya ee adigu raga la soo sheekayso soona weydii colaadda."

Intii ay Cigaal iyo xaaskiisii warkii isku hayeen ayaa qaylo soo yeedhey. Waxay maqleen, ”Hayaay! Waa coleey! Waa coleey!" Cigaal Xaaskiisii ayaa tiri, "Waar meesha ka carar!” Cigaal baa wuxuu yiri, “Naa carar meel ku gaadhi maayee rarada i saar, ka dibna waxaad tiraahdaa, `Ninkaygii wuu dhintey oo wuu gablamay!`” Inta ay raro saartey ayey baroor bilowday. Cigaal wuxuu dhaliilay oohintii xaaskiisa, markaasuu rarada hoosteeda ka yiri, ”Shalay buu dhintay dheh.”

Colkii inta fuleynimada Cigaal ka yaabeen ayey iska tageen.

NIN NACAS IYO TUUG

Nin tuug ah ayaa waxa uu doondoonay wax uu xado. Ninkii tuugga ahaa baa wuxuu la kulmay nin nacas ah.

Tuuggii baa waxa uu waydiiyey ninkii nacaska ahaa, ”Meelahan reero ma deggan yihiin.” Nacaskii baa yiri, ”Haa, oo reerkayega ayaa deggan halkaa.” Tuuggii baa yiri, ”Xaggeen u maraa?” Nacaskii baa yiri, ”Jidkan toos u raac, wuxuu ku geyn doonaa gurigayga, marka aad gaadho guriga ha xadin alaabta dhiidha iigu jirta, haddii aad xadana ii kaalay oo waxaan kaala hadli alaabtayda, haddii aan kaala hadhana dadka ayaan u yeeri, dadkuna waa uu ku ciqaabi.”

Tuugii waxaa uu la yaabey nin ninka doqonnimadiisa. Tuugii inta alaabtii xaday ayuu yiri, ”Illaahow ha inoo waayin nacas sirtiisa noo sheega.”

GORAYO

Gorayadu waa shimbir weyn oo ku nool duurka.

Waxa ay dhashaa ukun aad u weyn. Ukunteeda waa ay ku fariisataa si ay diirrimaad u siiso. Muddo ka dib ukuntu way dillaacdaa, waxaana ka soo baxa shimbir yar oo aad u qurux badan. Shimbirtaasi waxa ay noqotaa gorayo.

Weligaa goroyo ma aragtay?

Gorayada dheddig waxaa la yiraahdaa gorayo cawl, kan labka ahna waxaa la yiraa goray haldhaa. Gorayadu sida shimbiraha kale ma duusho, laakiin aad bay u dheeraysaa marka ay ordayso. Gorayadu waxa ay leedahay qoor dheer, baalal, ciddiyo iyo laba lugood oo dhaadheer.

FAADUMO IYO SHIMBIR

Maalin maalmaha ka mid ah ayaa faadumo oo u socota gurigooda waxa ay maqashay qaylo ka imanaysa geed hoostii. Faadumo waxa ay aaday geedkii, waxa ayna ka hoos heshay shimbir yar.

Faadumo waxa ay ogaatay in shimbirtu ay garab ka jaban tahay oo aysan duuli karin.

Faadumo waxa ay shimbirtii u qaaday gurigooda. Waxa ay ka dhex heshay gurigii dambiil yar, waxa ayna ku dhex riday shimbirtii garabka ka jabnayd.

Faadumo waxa ay shimbirtii u doontay cunto iyo dawo. Markii ay Faadumo baxdayba si dhakhso leh waxaa guriga u soo gashay bisad. Bisadu waxa ay durba urisay shimbirtii yareyd ee dambiisha ku jirtay. Dabadeedna bisadii waxa ay ku booday miis wyen oo guriga dhex yiilay. Shimbirtii jabnayd waxa ay aragtay bisadii oo soo laacaysa dambiishii, ka dibna waa ay naxday.

Islamarkiiba Faadumo ayaa guriga ku soo noqotay. Waxaa ay aragtay bisadii oo miiska dul fuushan. Waxa ay ogaatay waxa ay bisaddu damacsantahay.

Bisaddu maxaa ay doonaysay?

Faadumo waa ay qeylisay, bisaddiina dibadda ayey u carartay. Faadumo waxa ay markiiba fiirisay shimbirtii waxa ayna aragtay in ay nabad qabto. Faadumo waxaa ka muuqday wejigeeda farxad.

FAADUMO SAAXIIBTEEDA CUSUB

Caruurta dhigata dugsiga Dayax oo dhammi waa ay is yaqaannaan.

Inta badan waa ay isla ciyaaraan. Dhamaantoodna waa wada saaxiibo aad u wada faraxsan.

Maalin ayaa ardayad cusubi oo ka timid xaafad kale ku soo biirtay dugsiga. Gabadhaa cusubi qofna kama aysan aqoon dugsigeeda cusub.

Gabadhu waxa ay ahayd gabar yar oo xishood badan. Waxa ay u hadleysay si ka duwan caruurta kale. Had iyo jeer keligeed ayaa fasalka dhinac ka fariisan jirtay. Xilliga biririfta kaligeed ayaa ciyaari jirtey.

Faadumo oo ahayd gabar aad u caqli badan, ayaa waxa ay go'aan ku gaartay in ay la hadasho gabadha cusub ee dugsiga ku soo biirtay.

Faadumo gabadhii yarayd ayey si wanaagsan u salaantay, ka dibna waa ay wareysatay. Waxaa ay weydiisay xaafadda ay degen yihiin iyo halka ay ka soo guureen.

Faadumo waxaa ay bartay gabadhii gabdhaha kale ee dugsiga Dayax la dhigta. Gabadhii yarad aad bay u faraxday. Maalintaa wixii ka dambeeyey gabdhuhu waxay ahaayee kuwa wada ciyaara.

RAXMO IYO DHIRTA

Raxmo waa siddeed jir la nool qoyskooda. Qoyska Raxma waxa uu dhaqdaa xayn riyo ah. Riyaha waxay u daaq geysaa kayn aqalkooda u dhaw. Kayntu waxay leedahay dhir badan iyo daaq wanaagsan.

Weligaa geed ma beertay?

Maalin maalmaha ka mid ah Raxmo iyo eedadeed waxay isu raaceen kaynta si uga soo mireystaan.

Raxmo waxay eedadeed weydiisey, "Maxaynu maalin kasta meel fog ugu lugaynaa innagoo xaabo doonayna, uguna tagnaa midda ku taal kaynta inoo dhow?" Raxmo eedadeed ayaa tiri, "Dhirta iyo geeduhu waa nolosheenna. Waxa ay hoos siiyaan dadka. Ubaxooda iyo mirahooduba dawo ayaan ka samaysannaa. Waxa ay hoy u yihiin shimbiraha iyo xayawaanka kale. Xididdada dhirtu waaxa ay inoo celiyaan carrada si aanay u nabadguurin. Haddii qof uu jaro dhirta kayntu waa ay xalufaysaa."

Raxmo waxa ay garatay, waxa loo jari waayey kaynta tuuladu u dhow dhirteeda.